



Australian Government
Department of Home Affairs



Fasalada luqada Ingiriiska ee Soogalootiga xaqa u leh

ISBEDDELKA ADEEGYADA AMEP COVID-19 DARTEED

Fadlan ha imaan goobta barashada ee AMEP haddii aadan caafimaad ahaan fiicnayn.

Xaaladaha jira ee COVID-19 dartood, waxaa la samayn doonaa nidaam lagu bixinayo AMEP, sida habka online-ka ah ama wax ku barashada kala-durugsanaanta bulshada.

Fadlan la xiriir [Adeegbixiyaha AMEP](#) si toos ah si aad ugala hadasho nidaamkaan cusub.

Wax ka baro [COVID-19 iyo astaameheeda](#)

Soogalootioga Australia

BARNAAMIJKA INGIRIISKA EE SOOGALOOTIGA WAAWEYN

Barnaamijka Ingiriiska ee Soogalootiga Waaweyn (AMEP) wuxuu bixiyaa waxbarashada luqada Ingiriiska oo lacag la'aana ee dadka xaqa u leh, iyo habka fiisada xirfadlayaasha iyo kuwa habka aadamiga.

BIXINTA BARNAAMIJKA

Barnaamijka AMEP waxaa lagu bixiyaa 58 goobood gobolada Australia ee ku jira heshiiska, waxaana loogu talagalay inay

hantaan macmiilaha baahidiisa barashada iyaga oo siinaya xalal badan oo kala duwan oo isku dhexjira, kuwaas oo ay ku jiraan kala-durugsanaanta bulshada.

Waxaad ka helli kartaa faahfaahinta adeebixiyaha kuugu dhow ee dawlad goboleedka iyo Territoriga bogga [Adeegbixiyaha AMEP](#).

Waxaanu haynaa macluumaad ku saabsan AMEP oo lagu helli karo afaf badan. Arag macluumaad lagu turjumay afkaaga, booqo bogayaga [macluumaadka luqadaha kale](#).

XAQ U YEELASHADA

Si aad u hesho mudnaanta AMEP, shakhsiga waxaa waajib ku ah:

- Inuu joogo Australia
- In uusan lahayn Ingiriis meel mar ah sida uu qiimeeyey qof aqoon u leh oo ah shaqaalaha AMEP isaga oo dhinac dhigaya *Immigration (Education) (Functional English) Specification 2017*
- Horay aanay u qiimayn wasaaradu inuu leeyahay Ingiriis meel mar ah ama ka sarreeya, siintooda fiisaha (qofka haysta fiisada asaasiga ah keliya)
- Raac bilaabida diiwaangelinta iyo dhammaystirka waqtiga xadaynta (arag mudaynta hoose)
- Buuxi ugu yaraan mid ka mid ah kuwa soo socda:
 - inuu haysto fiisada joogtada ah ama fiiso ku meel gaar ah
 - inuu haysto fiisada xaq u yeelashada ku-meelgaarka ah sida lagu xusay noocyada fiisada ku meelgaarka ah
 - uu horay u haystay ogolaansho gelitaan oo rasmi ah uuna noqday muwaadin Australiayana
 - haddii shakhsigu uu ka yar yahay 18 sano, uuna leeyahay ugu yaraan hal waalid kaas oo haystay ama haysta ogolaansho gelitaan oo rasmi ah ama fiisa rasmi ah.

Ka yar 18 sannadood

Soogalootiga ku imanaya habka aadamiga oo jira inta u dhexaysa 15 iyo 17 sannadood, kaas oo aan lahayn Ingiriis meel mar ah xagga waxbarashada asaasiga ah, ayaa laga yaabaa inuu xaq u yeesho ka qaybgelidda barnaamijka.

Intay qaadanayso

Waxaa la dabakhayaa waqtiyada soo socda:

- Isku diiwaangeli lix bilood gudahood (18 sano jirka iyo ka weyn) ama 12 bilood (ka yar 18 sano).
- Waxbrashadu waxay ku bilaabanaysaa 12 bilood.
- Waxbarashadu waxay ku dhammaanaysaa shan sannadood.

Kuwa bixiya AMEP ayaa awooda inay dalbadaan kordhinta waqtiga iyaga oo ku hadlaya magaca macaamiisha wax baranaysa.

Dalabyada waxaa loo eegaa si ku salaysan dalabka oo waafaqsan shuruudaha hoos imanaya *Wasaarada Socdaalka (Waxbarashada) Xeerka 1971*.

DARYEELKA ILMAHA

Daryeel ilmood ayaa loo heli karaa macaamiisha AMEP oo haysta carruur yaryar oo aan dugsiga weli gaarin. Daryeelka ilmaha waxaa qabanqaabinaya adeega bixiyaha AMEP wuxuna ku yaallaa meel aan ka fogayn fasalka macmiilaha marka la heli karo.